Bilaabitaanka iskoolka wuxuu :
- Siinaayaa waayo aritinimo cusub ilmihiina
- Wax ka badalaayaa habka uu u noolyahay iyo kan qoyska (saacado joogta ah, faxas iskooleed, daal, galab seexasho, iwm.)

La xiriir dhakhtarka caruurta, dhakhtarka takhasuska u leh, ama iskoolka hadii aad shaki qabtid ama baahi gaar ah

Waxaad ka heleysaan wixii warbixin oo idin afacaayo sitka iskoolka :
**www.vevey-ep.ch**

Somali

## KUSOO DHAWAAW ISKOOLKA !


Bilaabida iskoolka ilmahaaga waa wadaagid safar dheer... Si uu u fududaado jidkaas, kaalintaada waalidnimo waa mid muhiim ah.

Isla shaqeynta qoyska-iskool-ka waxey xaqiijin u tahay waxbarasho toosan !

Aragtida fiican aad iskoolka kaqabtid waxey ku caawineysaa ardaynimadiisa.



## ADIGA AYAA I WADAAYO :



Iisheeg sheekooyin, xusuus qoyseed, dhacdooyin

Igu dhiirigali in aan la ciyaaro caruur kale iyo in aan la wadaago cayaaraheeyga

Ila isticmaal erayada aadaabta ah (fadlan, mahadsanid, maalin wanaagsan, iwm.)

Aan qaadano waqti aan ku gashto jaakadeyda, aan ku xirto shinyeerka, aan ku gashto kabaheyga

Qaado waqti aad igula hadashid, igu weydiisid su'aalo, igu dhageysatid

Igu dhiirigali in aan isdabaro kaligey, in aan sameyo cayaaro oo aan dhameystiro

Iidhaaf in aan kaligey musqusha aado, is tirtiro, dharkeyga dib u xirto, iska dhaqo gacmaha

Igu toosi in aan kala toosiyo cayaaraheyga iyo waxyaalaaha kale aan isticmaalay

Igu caawi in aan sheego waxa aan dareensahay

Aan wax isla karino, miiska isla diyaarino, isla hagaajino guriga

Aan gacmaha kuwada sameyno qalabyada (maqasta, qalin qoreyga, qalabka yaryar, cajiinka lagu ciyaaro, waraaqaha leysku toosiyo, iwm.)

Aan aadno maktabka, aan ku soo ciyaarno xarunta cayaaraha laga soo qaato

Ii wad socod, barxada, juqda, laaga dhinaciisa, iwm.

Isoo tus xaafadeyda, magaaladeyda

Aan iskoolka u lugeyno

Aan ciyaarno ciyaaro kala duwan xiliyada oo dhan si aan u dhaq dhaqaaqno (booditaan, koritaan, orad, wiifow, iwm.)

Aan isla caweyno, aan wada ciyaarno isbortis




Ilmahaaga wuxuu u baahanyahay joogitaankaada, la wadaagida waxyaalaha cusub uu la kulmay iyo dhiirigalin...